**OGAYSIISKAAN WUXUU SHARAXAYAA SIDA MACLUUMAADKA CAAFIMAADKA IYO XOGTA CUDURKA ISTICMAALKA MAADOOYINKA EE KUGU SAABSAN LOO ISTICMAALI KARO OO LOO SHAACIN KARO IYO SIDA AAD U HELI KARTO MACLUUMAADKAN. FADLAN SI TAXADDAR LEH U AKHRI.**

**Qabanqaabada Daryeelka Caafimaadka ee Diyaarsan.** St. Elizabeth Healthcare waxay ka qaybqaadataa goob daryeel caafimaad oo isku dhafan oo bukaannadu ay caadi ahaan daryeel caafimaad ka helaan in ka badan hal dhakhtar caafimaad ah. Qabanqaabadaan waxaa loogu yeeraa Qabanqaabada Daryeelka Caafimaadka ee Diyaarsan (ama OHCA) iyadoo la raacayo sharciyada federaalka ee xakameeya asturnaanta macluumaadka caafimaadka bukaanka. Taas macnaheedu waa marka aad adeegyo ka hesho St. Elizabeth Healthcare, waxaad ka heli kartaa adeegyo xirfadeed oo gaar ah dhakhaatiirta Shaqaalaha Caafimaadka, dadka deegaanka, iyo/ama ardayda caafimaadka ee ah xirfadlayaal madax-banaan oo aan ahayn shaqaale ama wakiillo ka tirsan St. Elizabeth Healthcare. Dhakhaatiirtaan madaxa-bannaan waxay aqbaleen inay u hoggaansamaan shuruudaha Ogeysiiskaan marka ay adeegyo ka bixinayaan St. Elizabeth Healthcare. Sidaa darteed, Ogeysiiskan wuxuu khuseeyaa dhammaan macluumaadkaaga caafimaad ee la sameeyay ama la helay natiijada ka dhalatay inaad tahay bukaan ka tahay St. Elizabeth Healthcare. Hase yeeshee, Ogeysiiskan ma khuseeyo xirfadlayaasha madaxa-bannaan ee ku shaqeeya xafiisyadooda gaarka ah.

**Yaa raaci doona ogeysiiskan?** Dhaqamada xogta asturnaanta ee ku jira ogeysiiskan waxaa raaci doona xirfadle kasta oo daryeel caafimaad oo kugu daaweeya mid ka mid ah goobaheena, dhammaan waaxyaha iyo cutubyada ururkeena (oo ay ku jiraan dhammaan qaybaha ama waaxaha ka baxsan kaambaaska), iyo dhammaan shaqaalaha shaqeeya, shaqaalaha iyo mutadawiciinta ururkeena.

**Ballanqaadka aanu kuu sameynay.** Waxaan fahamsanahay in macluumaadkaaga caafimaad, oo ay ku jiraan macluumaadkaaga caafimaad ee la ilaaliyo (protected health information, PHI) iyo diiwaanada daaweynta ee kasta oo ku saabsan Xanuunka Isticmaalka Maandooriyaha (Substance Use Disorder, SUD), sida ku xusan 42 CFR Qaybta 2-aad (Qaybta 2), ay tahay mid shaqsiyeed. Waxaa naga go'an inaan ilaalino macluumaadkaaga caafimaad. Waxaan abuurnaa diiwaan ku saabsan daryeelka iyo adeegyada aad hesho si aan u bixinno daryeel tayo leh iyo inaan u hoggaansanno shuruudaha sharciga. Ogeysiiskaan wuxuu khuseeyaa dhammaan diiwaannada daryeelkaaga ee aan hayno, ha ahaato mid ay sameeyeen shaqaalaha xarunta ama dhakhtarkaaga gaarka ah. Dhakhtarkaaga gaarka ah wuxuu yeelan karaa siyaasado ama ogeysiisyo kala duwan oo ku saabsan isticmaalka iyo shaacinta macluumaadkaaga caafimaad ee laga sameeyay xafiiska dhakhtarka.

**Ujeedada.** Sharci ahaan waxaa nalooga baahan yahay inaan diiwaannadaada daaweynta PHI iyo SUD u ilaalino si gaar ah, inaan ku siino ogeysiiskaan waajibaadkeena sharciga ah iyo dhaqamada xogta asturnaanta ee la xiriira macluumaadkaaga caafimaad, iyo inaan raacno shuruudaha ogeysiiska hadda shaqeynaya.

**Isbadellada ku yimaada Ogeysiiskan.** Waxaa laga yaabaa inaan marmar wax ka badelno siyaasadaheena, isbadelladaasina waxay khuseyn doonaan macluumaadka aan horey u haysannay, iyo sidoo kale macluumaadka ka dib marka isbeddelku dhaco. Haddii aan wax ka badel muhiim ah ku sameyno siyaasadaheena oo saameeya ogeysiiskan, waxaan badeli doonnaa ogeysiiskeena waxaana ku dhejin doonnaa ogeysiiska cusub xarumaheena iyo boggeena interneetka ee www.stelizabeth.com. Waxaad codsan kartaa nuqul ka mid ah ogeysiiska hadda jira wakhti kasta. Waxaa lagu siin doonaa nuqul ka mid ah ogeysiiska hadda jira mar kasta oo aad isdiiwaangeliso. Waxaa sidoo kale lagu weydiin doonaa inaad qirato in ogeysiiska lagu siiyay.

**Diiwaanada Bukaanka ee Xogta Qarsoodiga ah ee Isticmaalka Maandooriyaha**

Diiwaanada daaweynada qarsoon ee SUD (diiwaannada la xiriira isticmaalka khamriga ama daroogada, ogaanshaha, saadaasha, ama daaweynta ay sameeyeen ama ay hayaan barnaamij hoos yimaada 42 CFR Qaybta 2) oo aanu hayno ayaa xaddidaadyo dheeraad ah saaraya isticmaalka iyo shaacinta macluumaadka caafimaad ee noocaas ah. Qaybta 2-aad waxay khuseysaa barnaamijyo gaar ah oo federaalku maalgeliyo oo leh ujeeddada koowaad ee bixinta daaweynta SUD, ogaanshaha ama gudbinta daaweynta. Ilaa inta sharciga khuseeya uu ka adag yahay Qaybta 2-aad

ee ku saabsan sida aan u isticmaali karno ama u shaacin karno macluumaadkaaga caafimaadka, waxaan u hoggaansami doonnaa sharciga aadka u adag.

**Sida aan u isticmaali karno una shaacin karno macluumaadka caafimaadka ee adiga kugu saabsan.** Duruufo gaar ah marka la eego, waxaan xaq u leenahay inaan isticmaalno ama shaacino macluumaadkaaga caafimaad (laakiin ma aha diiwaannada daaweynta SUD) annagoo aan helin oggolaanshahaaga qoran. Tusaalooyin qaar oo ku saabsan goorta naloo oggol yahay inaan tan sameyno ayaa hoos lagu soo bandhigay:

> **Daaweynta.** Waxaan u isticmaali doonnaa ama cid kale la wadaagi doonnaa macluumaadkaaga caafimaad ee adiga kugu saabsan ayadoo ujeedadu tahay daaweyn dhakhaatiirta, kalkaaliyayaasha caafimaadka, farsamoyaqaannada, iyo daryeel bixiyaasha kale iyadoo la raacayo Oggolaanshaha Caafimaadka iyo Fasaxa aad saxiixday oo aad na siisay. Waxaan macluumaadka caafimaadka ee adiga kugu saabsan ka dhigi doonnaa ay heli karaan dhakhaatiirta daryeelka caafimaadka ee ku daweeya iyada oo loo marayo nidaam diiwaan caafimaad oo elektaroonik ah. Tusaale ahaan, dhakhtarkaaga kaa daaweynaya lug jaban xarunteena ayaa laga yaabaa inuu u baahdo inuu ogaado inaad tahay qof macaan qaba sababtoo ah cudurka macaanka wuxuu gaabinayaa habka bogsashada. Kalkaaliye caafimaad ama la-taliye cudurka macaanka ayaa laga yaabaa inuu xaaladdaada caafimaad kala hadlo dhakhtarkaaga.
>
> **Lacag-bixinta.** Waxaan u isticmaali doonaa oo shaacin doonnaa macluumaadkaaga caafimaad marka loogu baahdo ujeeddooyin lacag bixin, iyadoo la raacayo Oggolaanshaha Caafimaadka iyo Fasaxa aad saxiixday oo aad na siisay. Tusaale ahaan, waxaan macluumaadka ku saabsan daaweyntaada caafimaadka u gudbin karnaa shirkadaada caymiska si aan u diyaarino lacag bixinta adeegyada lagu siiyay ama waxaan u isticmaali karnaa macluumaadkaaga si aan u diyaarino qaan-sheegad aan adiga kuu soo dirno ama qofka mas'uulka ka ah lacagtaada. Waxaa laga yaabaa inaan macluumaadkaaga caafimaad u isticmaalno oo aan u shaacino hay'ad kale ama bixiye daryeel caafimaad si loogu fududeeyo bixinta lacagta hay'adda hesha macluumaadka. Tusaale ahaan, waxaa laga yaabaa inaan macluumaadka u gudbino shirkadda ambalaasta ee ku keentay isbitaalka si ay u diyaariyaan biilkaaga ama shirkaddaada caymiska ee adeegga ambalaaska.
>
> **Hawlgallada Daryeelka Caafimaadka.** Waxaa laga yaabaa inaan isticmaalno oo aan shaacino macluumaadka caafimaadka ee adiga kugu saabsan si aan u taageerno hawlgalladeenna daryeelka caafimaadka. Tusaale ahaan, waxaa laga yaabaa inaan isticmaalno ama shaacino macluumaadkaaga caafimaad si aan dib ugu eegno adeegyadeena iyo si aan u qiimeyno waxqabadka shaqaalaheena. Waxaan sidoo kale u isticmaali karnaa ama shaacin karnaa macluumaadkaaga caafimaad si aan u helno la-talin caafimaad oo ku saabsan daryeelkaaga ama daaweyntaada.

Marka laga reebo xaaladaha degdegga ah ee caafimaadka ama xaalado kale oo gaar ah, isticmaalka iyo shaacinta diiwaannadaada daaweynta SUD ee Daaweynta, Lacag-bixinta iyo Hawlgallada Daryeelka Caafimaadka waxay u baahan tahay oggolaanshahaaga qoran. Oggolaanshaha qoran wuxuu noqon karaa oggolaansho keliya dhammaan isticmaalka mustaqbalka iyo shaacinta hawlaha daaweynta, lacag bixinta, iyo daryeelka caafimaadka, waana ansax ilaa aad ka noqoto oggolaanshaha. Diiwaanada daaweynta SUD waxaa lala wadaagi karaa shaqaalaha ku jira isla barnaamijka Qaybta 2-aad ama hay'ad maamul ahaan xiriir la leh marka loo baahdo in la sameeyo baaritaanka, daaweynta, ama waajibaadka gudbinta.

Inta aad bukaan ku tahay xarunteena, <u>haddii aadan si kale noogu sheegin</u>, waxaan ku qori doonnaa **barta diiwannada bukaanka** magacaaga, goobta aad ka joogto isbitaalka, iyo xaaladdaada guud (sida "waa caadi" ama "wanaagsan"). Macluumaadkaan waxaan u gudbin doonnaa qof kasta oo magacaaga sheega. **Xiriirkaaga diimeed** waxaa loo sheegi karaa oo keliya xubnaha wadaadada, xitaa haddii ay sheegin magacaaga. Haddii aadan rabin inaan sii shaacino macluumaadkaas, fadlan u sheeg qofka ku caawinaya inta lagu jiro diiwaangelinta iyo/ama gelitaanka.

**Haddii aadan si kale noo sheegin**, waxaa laga yaabaa inaan macluumaadkaaga caafimaad (laakiin aan ahayn macluumaadka daaweynta SUD) la wadaagno xubin qoyska ka mid ah, saaxiib, iyo dadka kale oo aad aqoonsatay inay ku lug leeyihiin daryeelkaaga. Haddii xubnaha qoyska ama asxaabta ay joogaan inta daryeelka la bixinayo, waxaan u qaadaneynaa inaad ku qanacsan tahay in asxaabtaada kula socoto ay maqasho wadahadalka, haddii aadan si kale u sheegin mooyaanee. Xaalad musiibo marka ay jirto, waxaan sidoo kale shaaca ka qaadi karnaa macluumaadka caafimaadka ee la xiriira ururada gargaarka masiibooyinka si aan uga caawinno helitaanka xubnaha qoyskaaga ama asxaabtaada ama si aan ugu sheegno goobtaada, xaaladdaada ama dhimashadaada.

Waxaan u isticmaali karnaa ama shaacin karnaa macluumaadkaaga caafimaad ee kugu saabsan dadaallada **uruurinta lacagaha** si aan u taageerno xarunteena, haddii aadan si kale noo sheegin. Waxaan u isticmaali karnaa ama la wadaagi karnaa diiwaannada daaweynta SUD oo keliya uruurinta lacagaha haddii marka hore lagu siiyo fursad cad oo muuqata oo aad ku dooran karto inaadan helin fariimaha uruurinta lacagaha. Waxaan sidoo kale kuula soo xiriiri karnaa si aan kuu **xasuusino ballanta** ama aan kuugu sheegno ama aan kugula tallinno **fursadaha daaweynta ee suurtogalka ah iyo faa'iidooyinka ama adeegyada kale ee la xiriira caafimaadka** ee laga yaabo inay xiiso kuu leeyihiin.

Sharcigu wuxuu noo **oggol yahay ama naga** rabaa inaan isticmaalno oo shaacinno macluumaadkaaga caafimaad xaalado gaar ah iyada oo aan la helin oggolaanshahaaga.

Tusaale ahaan, waxaan shaacin doonnaa macluumaadkaaga caafimaadka (oo ay ku jiraan diiwaanka daaweynta SUD) haddii aan ka shakinno xadgudub ama dayacaad carruur loo geystay, haddii aan aaminsanahay inaad tahay **dhibbane xadgudub, dayacaad, ama rabshado qoyska ah loo geystay**, iyo sida sharcigu qabo inaad soo sheegto nabarrada, dhaawacyada iyo dambiyada. Waxaa laga yaabaa inaan shaaca ka qaadno macluumaadkaaga caafimaad (oo ay ku jiraan macluumaadka daaweynta SUD) ayadoo la raacaayo **ujeeddooyin caafimaad dadweyne** sida soo sheegista dhalashada iyo dhimashada, iyo soo sheegista macluumaadka si looga hortago loona xakameeyo cudurka; si kastaba ha ahaatee, diiwaan kasta oo daaweynta SUD ah oo loo shaaciyay ujeeddooyin caafimaad dadweyne waa laga saare doonaa wax kasta oo lagu aqoonsan karo, si aysan u jirin sabab macquul ah oo lagu aamini karo in macluumaadka loo isticmaali karo in lagugu aqoonsado adiga. Waxaa laga yaabaa inaan macluumaadkaaga caafimaad (oo ay ku jiraan macluumaadka daaweynta SUD) la wadaagno hay'ad kormeer caafimaad sida Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha si loogu sameeyo **hawlaha kormeerka caafimaadka** oo ay ku jiraan, laakiin aan ku xaddidnayn, sameynta baaritaan ama kormeer xarunteena. Waxa kale oo laga yaabaa inaan macluumaadkaaga caafimaad la wadaagno **baarayaasha meydka iyo agaasimayaasha aaska**, iyo sidoo kale **hay'adaha loogu deeqo xubnaha** (si loo fududeeyo ku-deeqidda iyo tallaalka xubnaha iyo unugyada).

Waxaa laga yaabaa inaan shaaca ka qaadno macluumaadka caafimaadka ee adiga kugu saabsan (laakiin aan ahayn diiwaannada daaweynta SUD) si loogu bixiyo **magdhowga shaqaalaha** haddii aad ku dhaawacantay shaqada. Waxa kale oo aanu shaacin karnaa macluumaadka caafimaadka **marka sharcigu ogolaado ama u baahdo**, sida marka laga jawaabayo codsi ka yimid **saraakiisha fulinta sharciga xaalado gaar ah**, iyo marka laga jawaabayo amarrada garsoorka, maamulka, ama maxkamadda ee ansax ah. Diiwaanada daaweynta SUD looma isticmaali karo ama lama shaacin karo **dacwad kasta oo sharci ah** oo adiga kaa dhan ah ilaa aad bixiso ogolaansho qoraal ah oo gaar ah ama maxkamaddu ay soo saarto amar. Xitaa amar maxkamadeed, waa in lagu siiyaa ogeysiis iyo fursad aad ku diiddo, amarkana waa inuu la socdaa amar maxkamadeed ama shuruud sharci oo la mid ah ka hor inta aan la sii deyn diiwaanka. Waxa kale oo laga yaabaa inaan shaaca ka qaadno macluumaadka adiga kugu saabsan (oo ay ku jiraan diiwaannada daaweynta SUD) marka ay jiraan **xaaladaha degdegga ah qaarkood ama si looga hortago ama loo yareeyo khatar halis ah oo ku soo fool leh caafimaadka** iyo badbaadada qofka ama dadweynaha. Waxaa laga yaabaa inaan sii deyno macluumaadkaaga caafimaad haddii aad xubin ka tahay militariga sida ay u baahan yihiin ciidamada qalabka sida, ama haddii **loo baahdo hawlaha amniga qaranka ama sirdoonka.** Waxa kale oo laga yaabaa inaan shaaca ka qaadno macluumaadka caafimaadka (oo ay ku jiraan macluumaadka daaweynta SUD) si loogu

adeegsado ujeeddooyinka daraasadaha **cilmi-baarista caafimaadka** marka isticmaalka noocaas ah uu ansixiyo Guddiga Dib-u-eegista Hay'adda.

**Si loogu adeegsado Isweydaarsiga Macluumaadka Caafimaadka.** Waxaa laga yaabaa inaan ka qayb qaadano hal ama in ka badan oo is-weydaarsiga macluumaadka caafimaadka (HIEs) waxaana si elektaroonik ah ula wadaagi karnaa macluumaadkaaga caafimaadka ujeeddooyinka daaweynta, lacag bixinta iyo hawlaha daryeelka caafimaadka ka qaybgalayaasha kale ee HIEs. HIEs waxay u oggolaanaysaa dhakhaatiirta daryeelka caafimaadkaaga inay si hufan u galaan oo u isticmaalaan macluumaadkaaga caafimaad ee lagama maarmaanka u ah daaweynta iyo ujeedooyin kale oo sharci ah. Haddii aadan ka bixin ka qaybgalka is-weydaarsigan macluumaadka, waxaa laga yaabaa inaan macluumaadkaaga caafimaadka siino HIE-yada aan ka qayb qaadanno si waafaqsan sharciga khuseeya.

**<u>Isticmaalka kale ee macluumaadka caafimaadka.</u>** Inta badan isticmaalka iyo shaacinta qoraallada daaweynta dhimirka (halka ay ku habboon tahay), isticmaalka iyo shaacinta PHI ujeeddooyin suuqgeyn, iyo shaacinta ka kooban iibinta macluumaadka caafimaadka ee la ilaaliyo waxay u baahan yihiin oggolaanshahaaga qoraalka ah. Xaalad kasta oo kale oo aan ku jirin ogeysiiskaan, waa inaan helnaa oggolaanshahaaga qoran kahor inta aan la isticmaalin ama aan shaaca ka qaadin macluumaadkaaga caafimaad. Haddii aad doorato inaad oggolaato isticmaalka ama shaacinta, waxaad xaq u leedahay inaad dib ula noqoto oggolaanshahaas adigoo qoraal ahaan noogu sheegaya go'aankaaga.

**<u>Isticmaalka kale ee macluumaadka daawaynta SUD.</u>** Guud ahaan, marka Qaybta 2-aad ay khuseyso ururkeenna, waxaa laga yaabaa inaan la wadaagin qof ka baxsan barnaamijka SUD inaad tahay bukaan barnaamijka ku jira ama aan shaaca ka qaadin macluumaad kasta oo lagu aqoonsanayo inaad tahay bukaan SUD ah haddii aan loo oggolaan sida ku xusan Qaybta 2aad. Hase yeeshee, waxaan u isticmaali karnaa oo aan shaacin karnaa diiwaannadaada daaweynta SUD iyadoo la raacayo ogolaanshahaaga qof kasta ama qayb ka mid ah dadka aad ku cadaysay ama guud ahaan aad ku magacawday ogolaanshaha. Tusaale ahaan, haddii aad bixiso ogolaansho qoraal ah oo magacaabaya xaaskaaga/saygaaga ama dhakhtarka daryeelka caafimaadka, waxaan macluumaadkaaga la wadaagi doonnaa sida ku xusan ogolaanshahaaga. Waxaa laga yaabaa inaan diiwaankaaga daaweynta SUD la wadaagno **diiwaanka dhexe** ama **barnaamij kasta oo maamul ama daaweyn ah** si looga hortago isdiiwaangelin badan, iyadoo la raacayo ogolaanshahaaga qoran. Waxaa laga yaabaa inaan macluumaadka laga helo diiwaankaaga daaweynta SUD u shaacino dadka ku jira **nidaamka cadaaladda dambiyada** ee ka dhigay ka qaybgalkaaga barnaamijka Qaybta 2-aad shuruud lagu xallinayo dacwad kasta oo dambi ah oo adiga lagaa soo oogay. Tusaale ahaan, haddii aad ogolaato, waxaan sarkaal ay maxkamaddu u magacowday ku wargelin karnaa xaaladdaada daaweynta iyadoo qayb ka ah heshiis sharci ama shuruudaha xukunka. Waxaa laga yaabaa inaan isticmaalno ama shaacino macluumaadkaaga daaweynta SUD marka aan sameyneyno **baaritaanno iyo qiimeynno maaliyadeed, maamul, ama barnaamij gaar ah.** Tan waxaa ka mid noqon kara la wadaagista macluumaadka aqoonsiga hay'adaha dowladda ee maalgeliya ama nidaamiya barnaamijka Qaybta 2-aad. Shaqaale aqoon u leh oo u shaqeeya maalgeliyaasha, qorshayaasha caafimaadka, ururada horumarinta tayada, ama hay'adaha leh kormeerka maamulka ayaa sidoo kale heli kara macluumaadkan si loogu sameeyo baaritaan ama qiimeyn. Waxaan ku wargelin karnaa daawada aan kuu qornay ama aan ku bixinnay **barnaamijka kormeerka daawada ee gobolka ee khuseeya** haddii uu sharciga gobolku u baahdo, iyadoo la raacayo oggolaanshahaaga. Waad ka noqon kartaa ogolaanshahaaga qoraalka ah adoo qoraal sameynaya, marka laga reebo ilaa heerka qofka sharciga haysta ee macluumaadka uu horey u dhaqmay isagoo ku tiirsan ogolaanshahaaga, oo ay ku xiran tahay xaddidaadaha hoos lagu sharraxay ee loogu talagalay shaacinta nidaamyada cadaaladda dambiyada. Waad la noqon kartaa ogolaanshaha adiga oo la xiriiraya Waaxda Maareynta Macluumaadka Caafimaadka ee St. Elizabeth Healthcare, 1 Medical Village Dr., Edgewood, KY 41017.

**<u>Xuquuqdaada ku saabsan macluumaadkaaga caafimaad.</u>** Inta badan, **waxaad xaq u leedahay inaad hesho nuqul iyo/ama aad baarto macluumaadka caafimaad** ee aan kaa hayno, marka aad qoraal codsato. Ka dib marka codsiga ugu horreeya ee nuqullada la sameeyo, waxaa laga yaabaa inaan kaa qaadno khidmad kharashka

nuqullada, boostada ama agabka kale ee la xiriira. Haddii aan diidno codsigaaga, waxaad soo gudbin kartaa codsi qoraal ah oo dib loogu eegayo go'aankaas. Xaaladaha qaarkood marka la eego, xirfadle kale oo shati haysta oo ay dooratay St. Elizabeth Healthcare ayaa dib u eegi kara codsigaaga. Qofka sameynaya dib u eegista ma noqon doono qofka diiday codsigaaga. Waxaan u hoggaansami doonnaa natiijada dib u eegista. Hase yeeshee, xaaladaha qaarkood, diidmadeena codsigaaga ee ah inaad baarto iyo/ama hesho nuqullada macluumaadkaaga laguma samayn doona dib u eegis.

**Waxaad xaq u leedahay inaad codsato inaan wax ka beddelno macluumaadkaaga caafimaadka**, adigoo soo gudbinaya codsi qoraal ah oo sheegaya sababta aad u codsanayso wax ka beddelka. Waxaan xaq u leenahay inaan diidno codsigaaga haddii macluumaadka aanu annagu samayn, haddii aanu ka mid ahayn macluumaadka caafimaad ee aanu hayno, haddii aanu ka mid ahayn macluumaadka aad sharci ahaan laguu oggolaan lahaa inaad baarto ama nuqul ka hesho, ama haddii aan u aragno in diiwaankaasi sax yahay. Haddii aan diidno codsigaaga, waxaan ku siin doonnaa qoraal oo ku saabsan sababta loo diiday iyo sharraxaada ku saabsan sida aad u soo gudbin karto qoraal ku saabsan diidmada. Haddii aadan gudbin qoraal ah oo ku saabsan diidmada, waxaad codsan kartaa in codsigaaga wax ka badelka iyo diidmada qoraalka ah la siiyo wixii shaacin ah ee mustaqbalka ee macluumaadkaaga caafimaad.

**Waxaad xaq u leedahay inaad hesho liis ka mid ah xaaladaha aan ku shaacinay macluumaadkaaga caafimaad** marka aad gudbiso codsi qoraal ah. Liiskaan kuma jiri doono: shaacinta loo sameeyay ujeedooyin la xariira daaweynta, lacag bixinta ama hawlaha daryeelka caafimaadka; shaacinta tooska ah ee laguu sameeyay; shaacinta aad oggolaatay iyadoo la raacayo oggolaansho la saxiixay; shaacinta ujeeddooyinka buugga xarunta ama dadka ku lug leh daryeelkaaga; iyo shaacinta loo sameeyay hay'adaha asluubta iyo ujeedooyin kale oo sharci fulin ah. Codsigu waa inuu sheegaa muddada loo baahan yahay xisaabinta, taasoo ah inay ka yar tahay muddo 6 sano ah oo ka bilaabata Abriil 14, 2003 ka dib. Waxaad liiska ku heli kartaa warqad ama qaab elektaroonik ah. Codsiga liiska shaacinta ee ugu horreeya muddo 12 bilood ah waa bilaash. Codsiyo dheeraad ah ayaa laga yaabaa in la bixiyo ayadoo la qaadaayo khidmad. Waxaan kuu sheegi doonnaa khidmadaha ka hor intaadan bixin wax kharash ah.

**Waxa kale oo aad xaq u leedahay in lagu ogeysiiyo haddii ay jirto jebinta macluumaadkaaga caafimaad ee aan la ilaalin.**

Haddii ogeysiiskan laguugu soo diray si elektaroonik ah, **waxaad xaq u leedahay inaad hesho nuqul warqad ah oo ogeysiiskan ah.**

**Waxaad xaq u leedahay inaad codsato in macluumaadka caafimaadka ee adiga kugu saabsan laguugu soo gudbiyo si qarsoodi ah**, sida in boosto loo diro Sanduuqa Boostada halkii aad ka diri lahayd cinwaanka gurigaaga, adigoo qoraal ahaan noogu sheegaya habka gaarka ah ama goobta aan u isticmaali karno inaan kula xiriirno. Kuma weydiin doonno sababta codsigaaga. Waan qaabili doonnaa dhammaan codsiyada macquulka ah, laakiin waxaa laga yaabaa inaan ku raacin karno codsigaaga.

**Waxaad qoraal ahaan u codsan kartaa inaanan u isticmaalin ama shaaca ka qaadin macluumaadka caafimaadka ee adiga kugu saabsan** daaweynta, lacag bixinta ama hawlaha daryeelka caafimaadka ama dadka ku lug leh daryeelkaaga marka laga reebo marka si gaar ah aad u oggolaato, marka sharcigu u baahdo, ama xaalad degdeg ah. Waxaad xaq u leedahay xayiraad ah inaadan la wadaaagin macluumaadka qorshahaaga caafimaadka adeegyada daryeelka caafimaadka ee aan bixinnay oo aad si toos ah noogu siisay lacag buuxda marka ujeeddada shaacintu ay tahay bixinta qorshaha caafimaadka ama hawlaha daryeelka caafimaadka. Looma baahna inaan ogolaano noocyada kale ee codsiyada. Haddii aan ku raacsanahay, waan u hoggaansami doonnaa codsigaaga haddii aan macluumaadka loo baahnayn si laguugu siiyo daaweyn degdeg ah.

**Ogeysiiska Dib u shaacinta**

Macluumaadka caafimaad ee la shaaciyo iyadoo la raacayo Ogeysiiskaan waxaa laga yaabaa in qofka qaataha ah dib loo shaaciyo ooaysan HIPAA sii ilaalin. Sharciyada khuseeya qaataha ayaa xaddidi kara awooddiisa isticmaalka iyo shaacinta macluumaadka caafimaad ee la helay - tusaale ahaan, haddii qaataha uu yahay hay'ad kale oo hoos timaada HIPAA ama Qaybta 2 aad.

**Ogaysiiska Kahortaga Takoorka**

St. Elizabeth Healthcare cidna ma takoorto iyadoo lagu saleynayo jinsiyadda, caqiidada, asalka qaranka, diinta, jinsiga, qowmiyadda, da'da, naafada, luqadda, ama xaaladda dhaqaale-bulsho.

**Cabashooyinka**

Haddii aad ka walaacsan tahay in xuquuqdaada xogta asturnaanta la jebiyay, in lagu takooray, ama haddii aad diidan tahay go'aano aan ka gaarnay helitaanka diiwaankaaga, waxaad cabasho qoraal ah u gudbin kartaa Xafiiskeena Asturnaanta (hoos ku qoran). Ugu dambeyntii, waxaad cabasho qoraal ah u diri kartaa Xafiiska Xuquuqaha Madaniga ah ee Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha ee Mareykanka. Xafiiskeena Xogta Qarsoon ayaa ku siin kara ciwaanka. Xaalad kasta ha ahaatee laguma ciqaabi doono ama lagaagama aargudan doono dacwadda aad gudbisay.

**Xafiiska Xogta Qarsoodiga ah ee HIPAA**

Haddii aad qabto su'aalo ama aad u baahan tahay caawimaad dheeraad ah oo ku saabsan Ogeysiiskaan, fadlan la xiriir Xafiiska Xogta Qarsoodiga ah ee HIPAA ee St. Elizabeth Healthcare, 1 Medical Village Dr., Edgewood, KY 41017, (859) 301-6266.

## Notice of Availability of Language Assistance Services and Auxiliary Aids and Services

**English:** SEH provides language assistance services and appropriate auxiliary aids, including electronic and written translated documents and oral interpretation, free of charge and in a timely manner, when such services are needed to provide meaningful access to an individual with limited English proficiency.

**ال عربية (Arabic):** قدم مستشفى St. Elizabeth Healthcare خدمات المساعدة اللغوية ووسائل الإعانة المناسبة، بما في ذلك خدمات ترجمة الوثائق الإلكترونية والمكتوبة وخدمات الترجمة الفورية الشفهية، مجانًا وفي الوقت المناسب، عند الحاجة إلى مثل هذه الخدمات لتوفير إمكانية الوصول المجدية للأفراد ذوي إجادة محدودة في اللغة الإنجليزية.

**မြန်မာ(Burmese): St.** Elizabeth Healthcare သည် အင်္ဂလိပ်ဘာသာစကားကျွမ်းကျင်မှုအားနည်းသော ပုဂ္ဂိုလ်အား အပြည့်အဝ ဝန်ဆောင်မှုရယူသုံးစွဲခွင့် ပံ့ပိုးပေးရာတွင် ဘာသာစကားအကူအညီဝန်ဆောင်မှုများကိုသာမက ဘာသာပြန်ဆိုထားသော အီလက်ထရောနစ်နှင့် လက်ရေးစာရွက်စာတမ်းများ၊ နှုတ်ဖြင့် စကားပြန်များအပါအဝင် သင့်လျော်သည့် အထောက်အကူပြု ဝန်ဆောင်မှုများကို လိုအပ်ပါက အချိန်နှင့်တစ်ပြေးညီ အခမဲ့ ပံ့ပိုးပေးသည်။

**繁體中文 (Chinese):** St. Elizabeth Healthcare **提供免**费且及时的语言援助服务和适当的辅助设备，包括书面翻译电子文件和口译服务，以便与英语能力有限人士进行有效沟通。

**Cushite Oroomiffa (Oromo):** St. Elizabeth Healthcare tajaajila gargaarsa afaanii fi deeggersa meeshaalee dhageettii, dubbii fi arguu barbaachisoo ta'an, sanadoota elektirooniksii fi barreeffamaan hiikamanii fi turjumaana afaanii dabalatee, kaffaltii malee fi yerootti tajaajilli akkasii barbaachisutti, nama dandeettii Ingiliffaa murtaa'aa qabu tokkoof dhaqqabamummaa hiika qabu ni kenna.

**Nederlands (Dutch):** St. Elizabeth Healthcare biedt gratis en tijdig taalondersteuning en passende hulp, waaronder elektronische en schriftelijke vertaling van documenten en een tolk, wanneer dergelijke diensten nodig zijn om de toegankelijkheid tot de zorg te verbeteren voor personen met een beperkte Engelse taalvaardigheid.

**Deitsch (Pennsylvania Dutch):** St. Elizabeth Healthcare dutt Lei helfe as Druwwel hen fer Englisch verschteh. Sell meent, sie kenne em Copies uff der Computer odder uff Babier griege vun Documents in Englisch as in differnti Schprooche getranslate sin. Sie kenne aa en Interpreter beigriege wammer Hilf braucht fer schwetze mit ebber in Englisch. Des alles duhn sie unni as es em ennich ebbes koscht, un gschwind.

**Français (French):** St. Elizabeth Healthcare fournit des services d'assistance linguistique et des aides auxiliaires appropriées, y compris des documents électroniques et écrits traduits et une interprétation orale, gratuitement et en temps opportun, lorsque ces services sont nécessaires pour fournir un accès important à une personne dont la maîtrise de l'anglais est limitée.

**Deutsch (German):** St. Elizabeth Healthcare bietet kostenlos und zeitnah Sprachmittlungsdienste und entsprechende Hilfsmittel an, wie die schriftliche Übersetzung von Dokumenten im elektronischen und Papierformat sowie mündliche Dolmetscherdienste. Auf diese Weise soll Personen mit eingeschränkten Englischkenntnissen ein ungehinderter Informationszugang ermöglicht werden.

**ह िं दी (Hindi):** अंग्रेज़ी का बहुत ज़्यादा ज्ञान न रखने वाले व्यक्तियों को सार्थक ऐक्सेस देने करने के लिए, St. Elizabeth Healthcare ज़रूरी होने पर, निःशुल्क और सही समय पर भाषा सहायता सेवाएँ और उपयुक्त सहायक उपकरण प्रदान करता है, जिसमें इलेक्ट्रॉनिक और लिखित अनुवादित दस्तावेज़ और मौखिक व्याख्या शामिल हैं।

**日本語 (Japanese):** St. Elizabeth Healthcare　は、英語が苦手な人に意味あるアクセスを提供するために、電子的および書面による翻訳文書や口頭通訳を含む言語支援サービス及び適切な補助手段を、無料で適時に提供いたします。

**Kinyarwanda (Kirundi):** St. Elizabeth Healthcare irungika serevise z'ugufasha ururimi n'imfashanyo z'abantu bafise ingorane mu kwumva, harimwo n'inyandiko z'ivy'ubuhinga bwa none n'uguhindura inyandiko yanditse n'ugusemura amajambo, ku buntu kandi mu buryo bubereye, mu kiringo izo serevise zikenewe kugira umuntu atazi neza icongereza ashobore kuronka izo serivisi azitahura neza.

**한국어 (Korean):** St. Elizabeth Healthcare 는 영어 능력이 제한된 개인에게 의미 있는 접근성을 제공하기 위해 이러한 서비스가 필요할 때 무료로 적시에 전자 및 서면 번역 문서와 구두 통역을 포함한 언어 지원 서비스와 적절한 보조 도구를 제공합니다.

**नेपाली (Nepali):** St. Elizabeth Healthcare ले सीमित अङ्ग्रेजी प्रविणता भएका व्यक्तिलाई अर्थपूर्ण पहुँच उपलब्ध गराउन आवश्यक हुँदा निःशुल्क रूपमा र समयमै विद्युतीय र लिखित अनुवादित कागजात र मौखिक अनुवादहरूलगायतका भाषासम्बन्धी सहायता सेवा तथा उपयुक्त सहायक सामग्रीहरू उपलब्ध गराउँछ।

**ਪੰਜਾਬੀ (Punjabi):** St. Elizabeth Healthcare ਭਾਸ਼ਾ ਸਹਾਇਤਾ ਸੇਵਾਵਾਂ ਅਤੇ ਉਚਿਤ ਸਹਾਇਕ ਉਪਕਰਣ ਪ੍ਰਦਾਨ ਕਰਦੀ ਹੈ, ਜਿਸ ਵਿੱਚ ਇਲੈਕਟ੍ਰਾਨਿਕ ਅਤੇ ਲਿਖਤੀ ਅਨੁਵਾਦ ਕੀਤੇ ਦਸਤਾਵੇਜ਼ ਅਤੇ ਮੌਖਿਕ ਵਿਆਖਿਆ ਸ਼ਾਮਲ ਹਨ, ਮੁਫਤ ਅਤੇ ਸਮੇਂ ਸਿਰ, ਜਦੋਂ ਅਜਿਹੀਆਂ ਸੇਵਾਵਾਂ ਦੀ ਲੋੜ ਸੀਮਤ ਅੰਗਰੇਜ਼ੀ ਮੁਹਾਰਤ ਵਾਲੇ ਵਿਅਕਤੀ ਨੂੰ ਅਰਥਪੂਰਨ ਪਹੁੰਚ ਪ੍ਰਦਾਨ ਕਰਨ ਲਈ ਹੁੰਦੀ ਹੈ।

**Русский (Russian):** В больнице St. Elizabeth Healthcare бесплатно и своевременно предоставляются языковые услуги и другая помощь (в том числе услуги электронного, письменного и устного перевода), когда это необходимо, чтобы обеспечить полноценный доступ для лиц с ограниченным знанием английского языка.

**Srpsko-hrvatski (Serbo-Croatian):** St. Elizabeth Healthcare pruža usluge jezičke pomoći i odgovarajuća pomoćna pomagala, uključujući elektronske i pismene prevedene dokumente i usmeni prevod, besplatno i blagovremeno, kada su takve usluge potrebne da bi se obezbedio smislen pristup osobi sa ograničenim znanjem engleskog jezika.

**Español (Spanish):** St. Elizabeth Healthcare proporciona servicios de asistencia lingüística y ayudas auxiliares adecuadas, incluidos documentos electrónicos y escritos traducidos e interpretación oral, gratuita y oportunamente, cuando dichos servicios son necesarios para proporcionar un acceso significativo a una persona con dominio limitado del inglés.

**Tagalog (Tagalog):** Nagbibigay ang St. Elizabeth Healthcare ng mga serbisyo ng tulong sa wika at naaangkop na mga auxiliary na tulong, kabilang ang mga electronic at nakasulat na mga isinaling dokumento at pasalitang interpretasyon, nang walang bayad at sa napapanahong paraan, kapag ang mga naturang serbisyo ay kinakailangan para magbigay ng makabuluhang pag-access sa isang indibidwal na limitado ang kahusayan sa Ingles.

**Tiếng Việt (Vietnamese):** St. Elizabeth Healthcare cung cấp dịch vụ hỗ trợ ngôn ngữ và các phương tiện hỗ trợ phù hợp, bao gồm tài liệu dịch điện tử và văn bản cùng dịch vụ thông dịch, tất cả đều miễn phí và kịp thời khi các dịch vụ đó cần thiết cho cá nhân có trình độ Tiếng Anh hạn chế.